URTIKARIA IYO ANJIOEDEMA

Waa maxay ujeeddooyinka buugyarahan?

Waxaa buugyarahan loo qoray si lagaaga caawiyo in aad wax dheeraad ah ka fahanto cudurka urtikaria ee firiirica cuncunka leh iyo cudurka anjioedema ee firiirica cuncun dheeraad ah leh. Waxaa laguugu sheegayaa waxa ay yihiin, waxa keena, waxa aad ka qaban karto, iyo halka aad ka heli karto war dheeraad ah oo ku saabsan. Qaybta ugu horraysa ee buugyarahan waxay ugu badnaan ka hadlaysaa cudurrada urtikaria iyo anjioedema ee caadi ah. Noocyada kale ee cudurka urtikaria, iyo siyaabaha ay uga duwan yihiin cudurka urtikaria ee caadi ah, waxaa lagu qeexayaa qaybta labaad ee buugyaraha.

Waa maxay cudurrada urtikaria iyo anjioedema?

- Cudurka urtikaria waa caadi, waxuuna mar uun noloshooda saameeyaa dadka qiyaas ahaan boqolkiiba 20. Waxaa weliba loo yaqaannaa firiirica cuncunka leh. Bararrada waqti yar ee cudurka urtikaria waxaa loo yaqaannaa dildilo (halka hoose ka eeg).
- Cudurka anjioedema waa nooca cudurka urtikaria ee sii qotodheer.

Qofka cudurradan qaba waxuu yeelan karaa cudurka urtikaria oo keliya, ama cudurka anjioedema oo keliya, ama labada wadajir. Nooca ugu badan waxaa loo yaqaannaa ócudurka urtikaria ee caadi ahô oo badi u kala baxa noocyada ódaranô iyo ódabadheeraad ahô Nooca ódaranô ee cudurrada urtikaria/anjioedema, waxuu qofka hayaa xoogaa maalmo ah ilaa lix toddobaad. Nooca cudurka urtikaria ee dabadheeraad ah, sida uu tilmaamayo, waxuu qofka hayaa muddo lix toddobaad ka badan.

Noocyada kale ee cudurka urtikaria ee ka tiro yar waxaa lagu qeexay qaybta dambe ee buugyarahan. Waxaa weliba ku jira cudurka la yiraahdo *urtikarial vaskulitis* (goortaasoo bararka xididdada dhiiggu uu keeno firiiric u eeg

4 Fitzroy Square, London W1T 5HQ
Tel: 020 7383 0266 Fax: 020 7388 5263 e-mail: admin@bad.org.uk
Registered Charity No. 258474

cudurka urtikaria, waxuuna markaa ka duwan yahay cudurka urtikaria ee caadi ah).

Maxaa keena cudurrada urtikaria iyo anjioedema?

Labadaba waa keena walaxa histamine la yiraahdo oo ka soo baxa unugyada haragga oo la yiraahdo unugyada waaweyn. Waxay taasi ku iman kartaa siyaabo farabadan, tusaale ahaan jimicsiga, cadaadiska haragga, iyo waxyaabo kaloo jirka la xiriira, iyo weliba cuntada, daawooyinka iyo bukaanshaha jeermis. Hase yeeshee nooca ócaadiga ahô ee cudurrada urtikaria iyo anjioedema, caadi ma aha in la soo helo sabab dibadda ka timid. Bukaanleyda qaba cudurka urtikaria ee caadi ah ee dabadheeraad ah qaarkood, walaxa histamine ee ka soo baxa unugyada waaweyn ee haragga waxaa keena waxyaabo ku jira dhiigga, sida unugyada jirka difaaca oo ku toosa unugyadooda waaweyn - nidaam loo yaqaanno difaaca laftigaaga ku toosan (autoimmunity). Baaritaanno caadi ahi taas diyaar uma aha, guud ahaanna wax kama beddelaan noocyada daawaynta ee la isticmaalo.

Badi sabab looma heli karo cudurka urtikaria ee daran, laakiin mararka qaar waxuu ku iman karaa bukaanshaha sida hargabka, ifilada ama cune xanuunka. Qiyaas ahaan daawo kaste ayaa keeni karta cudurka urtikaria ee ódaranô laakiin daawooyinka xanuunka joojiya (gaar ahaan asbiriinta iyo daawooyinka sida ibuprofen), anitbiyootigyada (gaar ahaan benisiliinta) iyo tallaallada ayaa ugu suurogal badan in ay sabab u yihiin. Cudurka anjioedema, gaar ahaan, waxaa keeni kara nooc daawo (celiyeyaasha ACE) oo lagu daaweeyo dhiigkarka. Cuntadu caadi ahaan sabab uma aha cudurka urtikaria ee daran, inkastoo mararka qaar looska, kalluunka, yaanyada, khudaarta iyo miraha beeri ay sabab u noqon karaan.

Waa maxay calaamadaha cudurrada urtikaria iyo anjioedema?

Calaamadda ugu badan ee cudurka urtikaria waa cuncun: hase yeeshee, cudurka anjioedema caadi ahaan cuncun ma leh. Inkastoo cudurka urtikaria saxariir laga dareemi karo, sababtoo ah cuncunka iyo muuqaalkiisa, saamayn toos uguma leh caafimaadka guud. Marar dhif ah, bararka cudurka anjioedema ayaa saamayn kara carrabka ama cunaha, waxuuna adkeeyaa neefsashada ama wax liqidda. Waxaa taas laga dareemi karaa argagax laakiin marar dhif ah ayay taasi nafta khatar gelisaa, wixii aan ahayn marka xasaasiyad loo leeyahay cuntada ama daawada iyo nooca cudurka anjioedema ee dhif ah ee la iska dhaxlo.

Cudurrada urtikaria iyo anjioedema miyaa la iska dhaxlaa?

Nooca badan ee ó caadi ahôee cudurrada urtikaria iyo anjioedema la iskama dhaxlo.

Maxay u eeg yihiin cudurrada urtikaria iyo anjioedema ee caadi ah?

Dildilaha cudurka urticaria ayaa yeelan kara midabka hilibka jirka, casaan khafiif ah ama casaan caadi ah. Waxay yeelan karaan qaabab iyo dhumucyo kaladuwan, laakiin waxay badi u eeg yihiin mudista gubtaanyada. Sifada muhiim ah ee ka mid ah cudurka urtikaria waa in dhaawacyada gaar ahi ay caadi ahaan ku baabaô an maalin keliya, waxayna badi qofka ka muuqdaan dhowr saacadood oo keliya. Hase yeeshee, waxay badi boogo ku dhaafaan gaar ahaan carruurta. Dildilo cusub ayaa ka dib meelo kale ka soo bixi kara. Cudurka urtikaria ee caadi ah wixii khuseeya, dildiluhu waxay ka soo bixi karaan meel kastoo jirka ka mid ah, waqti kaste.

Bararrada cad ama casaan khafiif ah, ee sii qotodheer ee cudurka anjioedema waxay badi ku dhacaan baalasha indhaha, dabnaha iyo mararka qaar afka, laakiin waxay ka soo bixi karaan meel kaste. Caadi ahaan cuncun ma leh, waxayna badi ku qaboobaan xoogaa maalmo ah. Haddii gacmaha iyo cagaha ay gaaraan, waxaa laga dareemi karaa adkaansho iyo xanuun.

Sidee cudurka urtikaria ee caadi ah loo soo ogaan doonaa?

Caadi ahaan muuqaalkiisa, ama qeexitaanka laga bixiyo, ayaa ku filan si uu takhtarkaagu u soo ogaado. Dadka intooda ugu badan sabab looguma heli karo, inkastoo takhtarkaagu uu ku weydiin doono suô aalo si uu isugu dayo in uu mid soo helo. Ma jiro baaritaan gaar ah oo si kalsooni leh u soo ogaan kara sababta cudurka urtikaria, laakiin baaritaannada qaarkood ayaa la qaban karaa haddii jawaabahaagu ay tilmaamaan sabab dahsoon.

- Wixii khuseeya cudurka urtikaria ee daran, baaritaan caadi ahaan looma baahna. Mararka qaar, haddii lagu tuhunsan yahay ficilcelin xasaasiyeed, baaritaan dhiig oo gaar ah, oo lagu soo helo unugyada difaaca ee jirka ee dhiigga ku jira, ama duridda haragga ayuu samayn karaa xirfadle takhasus u leh cudurka haragga ama xasaasiyadda.

- Wixii khuseeya cudurka urtikaria ee dabadheeraad ah, marar dhif ah ayay xasaasiyaddu sabab u tahay, markaa looma baahna baaritaannada caadi ah ee xasaasiyadda. Dadka tiro yar oo ka mid ah, cuntada, walaxyada midabaynta iyo shayada lagu dhawro ee ku qasan ayaa u muuqda in ay iyaga uga sii daraan cururka urtikaria, waxaana

waxtar yeelan karta in aad xusuusqor ka samaysato cuntadaada: waxaa walaxyadaas laga saari karaa cuntada si loo eego haddii xaaladdu ay roonaato, waxaana ka dib si ulakac ah dib loogu dari karaa si loo xaqiijiyo haddii ay iyagu sabab u yihiin cudurka urtikaria. Hase yeeshee, maadama cudurka urtikaria uu yahay cudur isbedbeddel badan, taasi marwalba sax ma aha oo marwalba si shaki laôaan ah kuuma tusi doonto sababta dhibaatada.

Miyaa la wada daawayn karaa cudurrada urtikaria iyo anjioedema ee caadi ah?

Noocyada daawaynta ee hoos ku xusan ayaa lagu celiyaa xaaladda cudur halkii lagaga wada daawayn lahaa. Dadka qaba cudurka urtikaria ee caadi ah ee dabadheeraad ah nuskood, firiiricu waxuu ku socdaa 6 ilaa 12 bilood, ka dibna tartiib tartiib ayuu uga baabaôa, inkstoo uu waqti dheeraad ah sii socon karo. Caadi ahaan qofka kuma soo noqdo. Hase yeeshee, lama saadaalin karo sida uu cudurka urtikaria shakhsi keliya u qaban karo.

Waa maxay daawaynta cudurka urtikaria ee caadi ah?

- Waxaa muhiim ah in laga fogaado *waxyaabaha ka sii dari kara cudurka urtikaria*. Waxyaabahaas waxaa si faahfaahsan loogu qoray halka hoose cinwaanka ô*Maxaan anigu samayn karaa?*ôhoostiisa.

- *Daawooyinka xasaasiyadda ee antihimiines la yiraahdo* ayaa celiya saamaynta walaxa histamine la yiraahdo, waxayna cuncunka iyo firiirica ka yareeyaan dadka intooda ugu badan, laakiin waxaa suurogal ah in aanay wada reebin cudurka urtikaria. Haddii cudurka urtikaria uu si joogto ah u soo baxo, waxaa ugu fiican in daawooyinka xasaasiyadda si joogto ah loo qaato. Waxaa jira noocyo farabadan oo kaladuwan. Kuwa waqti hore soo baxay waxay badi keenaan hurdo. Kuwa ka cusub waxaa aad ugu suurogal yar in ay hurdo keenaan, laakiin waxay keeni karaan haddii khamri lagu cabbo. Ma jirto daawo xasaasiyad oo gaar ah oo dadkoo dhan ugu fiican, markaa takhtarkaaga ayaa u baahan kara in uu tijaabiyo kuwo kaladuwan si uu u soo helo midka adiga kuugu fiican. Kiniinnada daawada xasaasiyadda ayaa loo baahan karaa in la qaato muddada cudurka urtikaria uu socdo. Marar aad u dhif ah ayaa laga soo warbixiyey dhibaatooyin soo raaca oo daran, laakiin mararka qaar xoogaa ayaa culays dadka saara, qaarna ma habboona in la qaato isla waqtiga daawooyin gaar ah.

- *Nooca daawada xasaasiyadda ee ku xiran* (tusaale ahaan cimetidine iyo ranitidine), oo caadi ahaan lagu daaweeyo boogaha caloosha dhexdeeda, ayaa lagu dari karaa daawooyinka xasaasiyadda ee caadi ah ee lagu daaweeyo haragga.

- *Daawooyinka jirka la mariyo* sida boomaatada ka samaysan daawada calamine ama daawada haahda leh ee ku jirta labeen biyo leh ayaa la isku qaboojin karaa.

- Haddii kiniinnada daawada xasaasiyaddu aanay waxtar lahayn waxaad taas kala hadli kartaa takhtarkaaga isaga ayaana kuu qaban qaabin kara baaritaanno dheeraad ah, waxuuna tijaabin karaa *daawooyin kale*. Kuwaas qaarkood (sida *montelukast*, daawada loogu talagalay naqaska) ayaa laga yaabaa in aanay shati u lahayn cudurka urtikaria, laakiin waxay noqon karaan daawooyin waxtar leh.

- *Daawooyinka steroid ah ee afka* ayaa mararka qaar waqti kooban laga bixin karaa kicitaanka xun ee cudurka urtikaria ee daran ama dabadheeraad ah, laakiin guud ahaan looma baahna.

- *Daawooyin cusub oo lagu celiyo nidaamka difaaca ee jirka* (sida ciclosporin) ayaa loo isticmaalaa xoogaa ka mid ah dadka sida ugu xun cudurku u saameeyo iyagoo lagu bixiyo xarumaha haragga iyo xasaasiyadda ee takhasus leh, waxaana laga heli karaa faaîido.

- *Mudista hormoonada adrenaline* (epinephrine) (oo iskaa la isugu mudi karo) ayaa badi si dhakhso ah u qaboojisa cudurka, laakiin noocan daawaynta waxaa loo isticmaalaa uun xaaladaha ugu daran, sida haddii cudurka urtikaria ama anjioedema uu keeno dhibaatooyinka neefsashada.

Maxaa anigu samayn karaa?

- Waxaa muhiim ah in aad ka fogaato wax kastoo ka sii dari kara cudurka urtikaria, sida kulaylka, dharka kugu dhejisan, khamriga, iyo daawooyinka asbiriin leh, iyo haddii ay suurogal tahay daawooyinka kale ee la siman sida ibuprofen (baarasatamoolku caadi ahaan dhibaato ma keeno).
- Daawooyinka la yiraahdo celiyeyaasha ACE (oo badi lagu daaweeyo dhiigkarka) waa in laga fogaado, gaar ahaan haddii uu jiro cudurka anjioedema.

- Cuntada, walaxyada midabaynta iyo shayada lagu dhawro waxaa laga fogaan karaa mararka dhif ah ee si cad loo soo ogaaday in ay kuwaasi dhibaato yihiin.
- Talobixin caafimaadeed si degdeg ah u doono haddii aad dhibaato ka qabto neefsashada ama wax liqidda.
- Ku fikir in aad soo iibsato jijinta *Digtoonida Caafimaadka (Medic Alert)* si aad dadka kale ugu ogaysiiso xaaladdaada haddii ay timaaddo xaalad kuu diiddan in aad laftigaagu u sheegto:

  Medic Alert Foundation:
  1 Bridge Wharf
  156 Caledonian Road, London N1 9UU
  Tel: (020) 7833 3034
  Telefoonka bilaash ah 0800 581 420

Noocyada kale ee cudurka urtikaria

- ***Cudurrada urtikaria ee jirka la xiriira.*** Noocyo kaloo cudurka urtikaria ah waxaa keena shayo jirka taabta sida kulaylka, qabowga, xoqidda, cadaadiska haragga iyo xataa biyaha. Dildiluhu waxay caadi ahaan ku soo baxaan daqiiqado, waxayna muuqdaan muddo saacad ka yar (marka laga reebo cudurka urtikaria ee ku yimaadda cadaadiska raaga). Noocyada cudurka urtikaria ee jirka la xiriira waxay caadi ahaan ku dhacaan dadka qaangaar ah ee dhallinyaro ah, mana aha qayri caadi. Waxay soo raaci karaan cudurka urtikaria ee caadi ah, ama mid kaloo noocooda ah, waxayna badi hagaagaan waqti ka dib. Waxaa ka mid ah noocyada soo socda:

  Xarriiqidda haragga ("qoraalka haragga"). Noocan marka la qabo, dildilo cuncun leh ayaa soo baxa ka dib xoqidda sida haragga oo la duugo ama la taabto, taasoo guud ahaan cuncun badan gaar ahaan marka kulayl jiro. Dildilaha iyo calaamadaha cas waxay badi ku soo baxaan xarriiqyo ka muuqda meelaha la xoqay, waxayna guud ahaan muuqdaan muddo saacad ka yar. Caadi ahaan sabab looma helo.

  Cudurka urtikaria ee qabowga. Qabowga, xataa roobka, dabaysha iyo biyaha qabow, ayaa keena cuncun iyo dildilo ka soo baxa meelaha qabow. Dabbaasha biyaha qabow dhexdeedu waxay keeni kartaa dildilo daran iyo suuxid, waana in laga fogaado. Bukaanleydu waa in ay cudurkooda urtikaria ee qabowga ka wargeliyaan shaqaalaha caafimaadka qalliinnada ka hor, haddii ay dildilo soo baxaan muddada qalliinka la wado, si markaa loo tixgelin

karo cudurka urtikaria ee qabowga. Caadi ahaan sabab looma heli karo cudurka urtikaria ee qabowga.

Cudurka urtikaria ee cadceedda. Kani waa mid dhif ah. Casaan, cuncun iyo dildilo ayaa ku dhaca haragga islamarka ka dambaysa hoosjoogsiga iftiinka cadceedda, waxayna muuqdaan muddo saacad ka yar.

Cudurka urtikaria ee biyaha. Kani waa mid aad iyo aad dhif u ah. Dildilo yar yar ayaa ka soo baxa haragga meesha ay taabtaan biyaha heerkul kaste ah, caadi ahaan qarka sare ee jirka.

Cudurka urtikaria ee cadaadiska raaga. Bararro ayaa ka soo baxa haragga meelaha cadaadis la saaro, oo ka yimaadda tusaale ahaan dharka kugu dhejisan ama qalabka aad qabato. Caadi ahaan bararku waxuu soo baxaa dhowr saacadood ka dib. Waxuu yeelan karaa xanuun waxuuna muuqdaa muddo maalin ka badan. Dadka leh cudurka urtikaria ee cadaadisku waxay ku dhawaad dhammaantood weliba qabaan cudurka urtikaria ee caadi ah.

Qaar farabadan oo ka mid ah cudurrada urtikaria ee jirka la xiriira waxaa lagu wanaajiyaa iyadoo laga fogaado sababtooda, iyo daawayn joogto ah oo loo adeegsado daawooyinka xasaasiyadda. Hase yeeshee, daawooyinka xasaasiyaddu caadi ahaan waxtar uma leh cudurka urtikaria ee cadaadiska raaga. Mararka qaar daawooyinka steroid ah ee afka oo muddo kooban la qaato ayaa waxtari doona haddii calaamadaha cudurka urtikaria ee cadaadiska raaga ay aad u daran yihiin.

- ***Cudurka urtikaria ee kolinerjik ah.*** Waxuu kani ku yimaaddaa xaaladaha keena dhididka, sida dadaalka badan, kulaylka, walwalka shucuureed iyo cunidda cunto basbaas leh. Daqiiqado gudahood, burooyin yar yar oo cuncun leh oo casaan kaladuwan ayaa soo baxa, caadi ahaan waxay ka soo baxaan qarka sare ee jirka laakiin jirkoo dhan ayay ku fidi karaan. Dildiluhu waxay muuqdaan muddo saacad ka yar, laakiin mararka daran way isku biiri karaan si ay bararro ka weyn u noqdaan. Daawooyinka xasaasiyadda ayaa caadi ahaan waxtar leh, waxaana mararka qaar ugu fiican in la qaato ka hor dhacdada cudurka kicin karta (sida jimicsiga).

- ***Cudurka urtikaria ee taabashada.*** Kiimikooyinka, cunto, geedo, xayawaan, iyo shayo xayawaan ka samaysan, oo kaladuwan ayaa daqiiqado gudahood ku soo saari kara dildilo ka soo baxa meesha ay

jirka ka taabtaan. Dildilahaasi waqti badan ma muuqdaan. Sababaha ugu badan waxaa ka mid ah ukunnada, looska (sida looska caadi ah), miraha dhanaan iyo macaan, cinjirka iyo taabashada mukulaalyada iyo eyda. Inkastoo badi ficilcelintu ay sahlan tahay, mararka qaar way xumaan kartaa, tusaale ahaan ka dib marka dadka dareen badan ay taabtaan cinjirka iyo looska.

- ***Cudurka anjioedema oo aan dildilo lahayn.*** Cudurka anjioedema ee ku yimaadda cudurka urtikaria laâantiis waxaa keeni kara sababo kaladuwan sida daawooyinka (matalan asbiriinta, celiyeyaasha ACE) ama xasaasiyadaha cuntada. Ugu badnaan waxuu qayb ka yahay cudurka urtikaria/ anjioedema ee caadi ah ee dabadheeraad ah, oo aan sabab loo heli karin.

- ***Cudurka anjioedema ee la iska dhaxlo.*** Kani waa nooc aad dhif u ah ee cudurka anjioedema oo badi qoysasku ay hidde u leeyihiin. Bukaanleydu waxay bararro ku yeeshaan wajiga, afka, cunaha, iyo mararka caloosha, taasoo keenta caloolxanuun daran. Xaaladda cudur waxay ka timaaddaa yaraanshaha borootiin dhiigga ku jirta oo waalidka laga dhaxlo waxaana lagu soo ogaan karaa baaris dhiig. Waxaa lagu daawayn karaa daawooyin lagaga hortago kicitaanka cudurka waxaana mararka qaar la beddeli karaa borootiinta dhiigga ku yar marka si xun cudur u kaco. Kicitaanka xun ee cudurka anjioedema ee la iska dhaxlo nafta ayuu khatar gelin karaa haddii la iska daawayn waayo; sidaas darteed waxaa bukaanleyda lagula talin karaa in ay xirtaan jijinta *Digtoonida Caafimaadka (Medic Alert)* si takhaatiirta loogu ogaysiiyo haddii ay xaalad degdeg ahi timaaddo.

- ***Urtikarial vaskulitis.*** Dadka qaba cudurka urtikaria tiro yar oo ka mid ah waxaa ka soo baxa dildilo ka muuqda muddo laba cisho ka badan. Waxay kuwaasi yeelan karaan damqasho waxayna mararka qaar isku beddelaan boog. Dadka xaaladdan cudur qaba waxay dareemi karaan caafimaad darro waxaana xanuuni kara kalagoysyada jirka iyo caloosha. Waxaa taas sabab u ah xididdadooda dhiigga oo barara (nidaam loo yaqaanno vaskulitis). Waxaa cudurka lagu xaqiijiyaa qayb yar oo ka mid ah dildilaha oo lagu eego miikariskoobka taasoo la soo jaray. Sababta marar dhif ah ayaa la helaa, inkastoo baaritaannada dhiigga caadi ahaan la qabto. Daawooyinka xasaasiyaddu waxtar badan ma leh laakiin waxaa la isticmaali karaa daawooyin kaloo bararka yareeya.

Halkeen ka heli karaa war dheeraad ah oo ku saabsan cudurka urtikaria?

Isku xireyaasha internetka ee lagu helo buugyareyaasha faahfaahsan:

www.dermnet.org.nz/dna.urticaria/urt.html
www.allergyuk.org

Waxay ujeeddada buugyarahan tahay in aad ka hesho warbixin sax ah oo ku saabsan mawduuca waxaana la isugu keenay fikradaha ay qabaan wakiillada Ururka Xirfadleyaasha haragga ee Ingiriiska: hase yeeshee, waxa ku jira ayaa laga yaabaa in uu mararka qaar ka duwan yahay talobixinta aad ka hesho takhtarkaaga.

URURKA XIRFADLEYAASHA HARAGGA EE INGIRIISKA
BUUGYARAHA WARBIXINTA BUKAANLEYDA
LA SOO SAARAY JANNAAYO 2006
LA CUSBOONAYSIIYEY MAARSO 2009

4 Fitzroy Square, London W1T 5HQ
Tel: 020 7383 0266 Fax: 020 7388 5263 e-mail: admin@bad.org.uk
Registered Charity No. 258474